MILWAUKEE PUBLIC SCHOOLS

HOMELESS EDUCATION PROGRAM
Department of Specialized Services
5225 W. Vliet Street, Room 138
Milwaukee, WI 53208
(414) 475-8911

Waalidka/Mas'uulka/Daryeelaha Dadka Waaweyn/Dhallinyarada Aan
La Wehelin ee Qaaliga Ahaaw:

Warqadani waxay sharraxeysaa xuquuqahaaga sida uu qabo Sharciga Kaalmada Guri La'aanta ee McKinney-Vento (Cinwaanka 'B-Education' ee loogu talagalay Carruurta iyo Dhallinyarada Guri la'aanta ah). Macluumaadka ku jira waxaa loogu talagalay in gacan loogu geysto gaaritaanka go'aanada danta ugu wanaagsan ugu jirta ardayga. Haddii aad qabtid su'aalo ama cabasho ku saabsan mid ka mid ah macluumaadka ku jira warqaddan, fadlan kala hadal Shaqaalaha Bulshada ee Iskuulka ama Maamulaha Dugsiga. Haddii aad u baahan tahay caawimaad dheeraad ah, wac Xafiiska Barnaamijka Waxbarashada Guri La'aanta (HEP) adigoo isticmaalaya taleefanka (414) 475-8911.

Mahadsanid,

Dugsiyada Dadweynaha ee Milwaukee

Waa kuma Hoylaawe?

Marka loo eego Sharciga Kaalmada Waxbarashada Dadka Guri La'aanta ah ee McKinney-Vento, waxaa laguu tixgelinayaa inaad tahay gurilaawe/hoylaawe haddii aad:

- guri la wadaagaysid (mee iskugu tageen) qoys kale ama asxaab sababo dhaqaale ama dhibaatooyin kale awgood
- joogtid hoy gargaar ah, barnaamij noolaleedka ku meel gaarka ah, huteel/albeergo, ama xero
- ku nooshahay waddada, baabuur, dhisme laga guurey ama hoyada kale ee aan hoynimo ku filnayn

Xuquuqda Ardayda La Kulmaysa Hoy La'aanta:

Sharciga Kaalmada Waxbarashada Dadka Guri La'aanta ah ee McKinney-Vento wuxuu xaqiijinayaa in dhammaan ardayda la soo derista hoy la'aanta, ee jira da'da iskuulka iyo da'da dugsiga xannaanada, ay xaq u leeyihiin inay helaan waxbarasho dowladeed oo ku habboon oo bilaash ah iyagoon kala kulmin wax caqabad ah. Gaar ahaan, ardayda la soo deristay hoy la'aanta waxay xaq u leeyihiin:

- inay dhigtaan iskuul, iyadoon loo eegin meesha ay ku nool yihiin (tusaale ahaan hoy gargaar ah, hoteel)
- inay sii joogaan dugsigii ay dhiganayeen ka hor intaanay hay la'aan noqon (iskuulka asalka ahaa) haddiiba ay tahay danta ugu wanaagsan ee ardayga iyo haddii ay tahay xulashada waalidka/masuulka/dhalinyarada aan la wehlin. Haddii xulashadooda aan la sharfin, waa in lagu wargeliyaa, qoraal ahaan, go'aankan iyo sababta ka dambeysa go'aanka. Rafcaan ayaa la codsan karaa haddii go'aanka la gaaray uu ka soo horjeedo rabitaankooda.
- inay heli karaan gaadiid lagu geeyo dugsiga asalka ah ama iskuulkii ugu dambeeyay ee ay dhigteen ka hor inta aysan noqon hoy la'aan, haddii ay tahay danta ugu wanaagsan ee ardayga
- iska diiwaangeliyaan iskuul dib udhac la'aan, xitaa haddii aysan haysan dukumiintiyada sida caadiga ah looga baahan yahay isdiiwaangelinta, sida qoraalada dugsiga, diiwaanka caafimaadka, diiwaanka talaalka ama ogolaanshaha waalidka ee dhalinyarada hoy la'aanta ah ee aan la wehlin
- inay iska diiwaangeliyaan iskuulka iyaga oo aan keenin cadeynta cinwaanka ama meesha ay degan yihiin
- inay iska diiwaangeliyaan oo ay dhigtaan iskuul dookhooda ah, xitaa inta lagu jiro hanaanka xallinta khilaafaadka ama rafcaanka
- inay dhigtaan iskuulka kana qeyb galaan hawlaha iyo barnaamijyada iskuulka si la mid ah asxaabtooda guryaha degan
- ardayda ay la soo daristo hoy la'aantu waa inaan kala sooc lagu samayn
- inay helaan barnaamijyada gaarka ah (Waxbarshada Gaarka ah, Halista, Hibada iyo Kartida, iwm.) si la mid ah asxaabtooda guryaha degan

Adeegyada ay heli karaan Ardayda La Kulmaya Hoy La'aanta:

Si meesha looga saaro caqabadaha la xiriira waxbarashada, adeegyo dhowr ah ayaa loo heli karaa ardayda la soo derista hoy la'aanta. Iyadoo ku xiran baahiyaha shaqsiyeed ee arday kasta, adeegyadan waxaa kamid noqon kara:

- gaadiid ku geynta dugsiga asalka ah ee ardayga
- barnaamijyada nafaqada dugsiga
- qalabka iyo khidmadaha dugsiga
- barnaamijyada kahor iyo kadib dugsiga ah
- barnaamijyada umeerinta casharrada
- kaalmada diiwaangelinta
- adeegyada waxbarashada dugsiga xannaanada/hore
- Adeegyada ESL
- adeegyada tarjumaadda
- adeegyada caafimaadka dugsiga
- Adeegyada iyo barnaamijyada 'Title-I'
- waxbarashada/barnaamijyada gaarka ah ee loogu talagalay ardayda naafada ah
- barnaamijyo xirfadeed iyo farsamo
- barnaamijyo kale iyo barnaamijyada halista 'at-risk'
- barnaamijyo hibada iyo kartida
- u gudbinta ilaha bulshada

Hanaanka Khilaafaadka Meeleynta Ardayda:

Marka khilaaf ka yimaado meelaynta dugsiga, waalidka/daryeelaha ama qofka dhalinyerada ah ee aan lala socon, waa inay buuxiyaan Foomka Xalinta Khilaafaadka ee khadka tooska ah https://mps.milwaukee.k12.wi.us/en/Families/Family-Services/Dispute-Resolution-Form.htm#form .
Qeybta Shaqaalaha Adeegga Macaamiisha ayaa kaa caawin kara buuxinta foomka khadka tooska ah ama ayaa kula hadli karaan ka hor intaadan buuxin foomka cabashada ee khadka tooska ah. Waaxda cabashada/ashtakada waxaa loo marinayaa aaga ku haboon waxaana lagaala soo xiriiri doonaa wixii ku saabsan waxaad ka welwelsan tahay. Xiriiriyaha Dadka Guri La'aanta ah ayaa go'aan ka gaari doona isagoo ku saleyn doona macluumaadka wuxuuna qofka dacwoonaya u diri doonaa nuqulka go'aanka. Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay inuu dhigto iskuulka uu doorto ilaa inta khilaafka laga xalinayo. Racfaanada ayaa la gudbin karaa iyadoo lala xiriirayo Isuduwaha Gobolka ee Waxbarashada Carruurta iyo Dhallinyarada Guri la'aanta ah ee Waaxda Tacliinta Dadweynaha (macluumaadka xiriirka hoos ayuu ku yaalaa). Wixii khilaafaad ah ee aan la xiriirin guri la'aanta, fadlan tixraac *Buugga Waalidka/Ardayga ee MPS ee ku saabsan Xuquuqda, Mas'uuliyadaha iyo Anshaxa.*

Kheyraadka iyo Macluumaadka

IMPACT 2-1-1
Liiska macluumaadka ilaha tooska ah & wada sheekaysiga tooska ah: www.211wisconsin.communityos.org
Telefoon: 211 ◆ (414) 773-0211 ◆ Wicitaan bilaash ah: 1-866-211-3380
Qoraal: Koodhka zipka u dir aha TXT-211 (898211)

Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta iyo Dhallinyarada Guri la'aanta ah
Websaydh: www.naehcy.org ◆ Taleefan: (612) 430-6995 ◆ Iimayl: info@naehcy.org

Xarunta Qaranka ee Waxbarashada Dadka Hoy La'aanta ah
Websaydh: www.nche.ed.gov ◆ Taleefan: 1-800-308-2145 ◆ Iimayl: homeless@serve.org

Isku Xirka Iskuulka (SchoolHouse Connection)
Websaydh: www.schoolhouseconnection.org
Taleefan: (202) 364-7392 ◆ Iimayl: info@schoolhouseconnection.org

Waaxda Waxbarashada Dadweynaha ee Wisconsin
Websaydhka Isuduwaha Gobolka ee Waxbarashada Carruurta iyo Dhalanyerada Guri la'aanta ah: www.dpi.wi.gov/homeless
◆ Taleefanka: (608) 267-1284